


# Chevron 209335 Goobta Nadiifinta



## Faallooyinka la aqbalay:

Diisambar 7, 2020-Janaayo 20, 2021

## Soo Gudbi Faallooyin:

Khadka tooska ah:

<https://bit.ly/Comment-Chevron209335>

Ama, iimeel ahaan:

Dale Myers, Site Manager  
 Toxics Cleanup Program  
 3190 160<sup>th</sup> Ave SE  
 Bellevue, WA 98008  
 Telefoonka: (425) 649-4446

Iimeelka: [dale.myers@ecy.wa.gov](mailto:dale.myers@ecy.wa.gov)

Fadlan tixraac "Chevron 209335" faallooyinkaaga.

## Macluumaadka Goobta:

<http://bit.ly/Ecology-Chevron209335>

Facility Site ID: 70996824  
 Site Cleanup ID: 6537

## Diiwaangeli goobaha dib loo eegi doono:

Department of Ecology  
 Northwest Regional Office  
 3190 160<sup>th</sup> Avenue SE  
 Bellevue, WA 98008-5452  
 Usoo wac ballan qabsi:  
 425-649-7190

## Muddada Faallada Dadweynaha

Department of Ecology (Ecology) waxay kala xaajootay heshiis sharciyeedka loo yaqaan Amarka laysku Waafaqay (AO) Chevron Environmental Management Company (CEMC) iyo Stone Way Apartments LLC (Stone Way) oo loogu talagalay goobta nadiifinta Chevron 209335 (goobta).

AO wuxuu CEMC iyo Stone Way ugu magacaabaa inay yihiin Dad Mas'uuliyada Ka soobixi karaan (PLPs) oona iyaga looga baahan yahay horumarinta iyo diyaarinta Warbixinta Baaritaanka / Suurtagalnimada Daraasadda (RI / FS) iyo qabyo-qoraalka Qorshe Hawleedka Nadaafadda (dCAP). Waxaan kugu martiqaadeynaa inaad dib u eegto oo aad faallo ka bixiso dukumiintiyada soo socda laga bilaabo Diisambar 7, 2020-Janaayo 20, 2021 adoo adeegsanaya tixraaca bidixda.

- **Amarka la aqbalay** – waxay ubaahantahay PLPs inay baaraan xaaladaha deegaanka, dhameystiraan Warbixinta RI / FS oo soo bandhigeysa natiijooyinka baaritaanka iyo qiimeynta beddelada hababka nadiifinta. DCAP waxay sharxaysaa sida nadiifinta lamidka ah ee la xushay loo fulin doono.

- **Qorshaha Ka Qaybqaadashada Dadweynaha**–wuxuu sharaxayaa sida Ecologyka ay bulshada ugu wargalin doonto waxqabadyada goobta iyo fursadaha ay kaga qeyb qaadan karaan howlaha nadaafadda.

## Wixii macluumaad dheeraad ah

Ka qeybgal kulanka onleenka deegaanka ee loogu talagalay bulshada ee Diseembar 15, 2020 ka bilow 6:00pm-7:00pm, ama Diseembar 17, 2020 ka bilaabo 9:30am-10:30am.

Booqo websaydhka daraasada xiriirka noolaha si aad isu diiwaangeliso oo aad u hesho faahfaahinta gelitaanka kulamada: <http://bit.ly/Ecology-Chevron209335>

# Toxics Cleanup Program

## Aasaas

Goobtu waxay ku taal 1215 N. 45th Street, Seattle, WA 98103 (Hanti). Hantida waxaa hadda iska leh oo ka shaqeeya Stone Way iyada oo ah dhisme isku mid ah oo la awoodi karo.

Saldhig adeeg ayaa ka howlgala Hantida ugu yaraan 1935. Shirkadda Shidaalka ee Standard (Heerka) (ka horreeyay Chevron U.S.A.) Inc.) iibsaday Hantida 1954 oo ay ka shaqeysay saldhigga adeegga shidaalka ee Hantida illaa laga saaray dhismaha xarunta adeegga iyo garaashka sanadkii 1969. Standard wuxuu ka iibiyey Hantida 1978 Seattle Housing Authority (SHA). SHA ayaa markaa ka iibisay Hantida Housing Resources Group (HRG) 2005, oo isla markiiba u wareejisay lahaanshaha Hantida Stone Way. Hantida ayaa tan iyo markaa loo sameeyay afar dabaq, dhisme tafaariiqle ah ama la dagi karo oo isku dhafan oo leh garaash dhulka hoostiisa.



Stone Way Apartments

## Shaqadii hore ee Nadiifinta

2005: Hantida waa la qoday, oo carrada saamaynta leh waxaa laga soo bixiyay cabir qoto dheer oo ah 13 ilaa 18 fuudh oo ka hooseysa dhulka qeeybta asalka ah ee ugu horeysa. Intaas waxaa sii dheer, wadar ahaan 20 baaldi oo ballac-ballaadhan ayaa lagu qoday qiyaastii 42 fuudh oo ka hooseysa salka dhulka asalka ah si looga soo saaro batroolka-hydrocarbon qotoda dheer ee ay saameysay ciida. Qiyaastii 2,490 tan oo carro ah ayaa laga saaray oo dib loogu buuxiyay carro nadiif ah ama xakameeynta buuxsamida ee cufnaanta (CDF). Shan taangi oo dhulka hoostiisa ku jiray ayaa laga saaray Hantida sidoo kale. Garaashka gawaarida la dhigto ee dhulka hoostiisa ah wuxuu xigaa Waqooyiga 45 th Wadada, Stone Way North iyo marinka korantada ee ka hortaga qodista dheeraadka ah. Ceelal dheeraad ah oo lagula soconayo biyaha dhulka hoostiisa ayaa la rakibey 2005.

2005 – 2018: Qeeybo kamid ah biyaha dhulka hoostiisa mara ayaa la ururiyey sanadkiiba ilaa 2018. Intaa waxaa sii dheer, dareerayaasha wajiga bilaa biyaha ah (LNAPL, ama waxyaabaha laga sameeyo batroolka ee dul sabeeya biyaha dhulka hoostiisa) ayaa laga saaray hal kormeer si fiican (usbuuciiba mar ilaa maalin walba) laga bilaabo Febraayo 2006 ilaa Ogosto 2006. Kuduritaanka bahasha jilcisa dusha sare oo loogu talagalay soo kabashada LNAPL ayaa dhacday 2013.

2018 – Maanta: LNAPL waxay sii waday in lagu arko Goobta ilaa 2018 hal ceel biyood si fiican loola socdo. Hadhaaga wasakhda batroolka ayaan khatar caafimaad u keeni doonin ganacsiyada ama dadka deggan dhismaha sababo la xiriira joogitaanka garaashka baarkinka dhulka hoostiisa, nidaamka hawo-qaadashada geerashka iyo gidaar uumiga ka ilaaliya dhismaha hoostiisa. Qiimaynta Farogelinta Uumiga (VIA, ama daraasadda hawada garaashka) ayaa la sameyn doonaa inta lagu jiro baaritaanka sixitaanka si loo xaqiijiyo fahamkaan.

## Kiimikooyinka laga walaaco

Kiimikooyinka ku haray carrada iyo biyaha dhulka hoostiisa waxaa ka mid ah:

- Waxsoosaarka batroolka (Gaaska, Diesel, Hydrocarbons-ka guud ee saliidda kujira)
- Benzene, Toluene, Ethyl-Benzene, and Xylene (BTEX)



Sawirka hawada ee Stone Way Apartments.



# Toxics Cleanup Program


## Maxaa xigi doona?

Haddii aan isbeddel la taaban karo lagu sameyn faallooyinka dadweynaha ka dib, dukumiintiyada waa la dhammaystirayaa oo hannaanka nadiifinta ayaa horay u socon doona.



## Nidaamka Nadaafadda Daraasada xiriirka noolaha

The **Qawaaniinta Xakamaynta Sunta (MTCA)** waa sharciga nadiifinta deegaanka ee Washington. Waxay bixisaa shuruudaha nadiifinta goobta wasakhaysan waxayna dejisaa heerar ilaaliya caafimaadka aadanaha iyo deegaanka. Ecologyka waxay dhaqangelisaa MTCA waxayna kormeertaa nadiifinta. Ah **Nidaamka nadiifinta goobta ee MTCA** waxaa lagu dhammeeyaa tillaabooyinka jadwalka isbeddelaya (fiiri sawirka hoose).



Toxics Cleanup Program  
3190 160<sup>th</sup> Avenue SE  
Bellevue, WA 98008-5452

## Muddada Faallada Dadweynaha: Chevron 209335 draft Agreed Order (Hindise sharciyeed qabyo ah)

### Muddada Faallada Dadweynaha

Diisambar 7, 2020-Janaayo 20, 2021

<http://bit.ly/Ecology-Chevron209335>

Washington Department of Ecology waxay codsanaysaa faallooyin ku saabsan dukumiintiyada la xiriira dadaallada nadiifinta ee lagu soo bandhigay meesha Chevron 209335, oo ku taal Seattle, WA.

Ka eeg gudaha faahfaahinta boggan iyo sida wax looga sheego!

Ka qeybgal kulanka onleenka deegaanka ee loogu talloagalay bulshada ee Diseembar 15, 2020 ka bilow 6:00pm-7:00pm, ama Diseembar 17, 2020 ka bilaabo 9:30am-10:30am.

Horay isaga diwaangeli <http://bit.ly/Ecology-Chevron209335>

Tarjumaadda waxaa lagu bixiyay Isbaanish, Tigrinya, Oromo, Kantonese, iyo Amxaar.



*Sawirka hawada ee Stone Way Apartments.*